MINNEAPOLIS PUBLIC SCHOOLS
Urban Education. Global Citizens.

Maareynta Nabdoonaanta Xaaladaha Degdega & Amniga

Tilmaanta Hagida waalidka iyo waxayaabaha aan qabaneyno

Horumarinta iyo Kormeerida Qorshayaasha Gurmadka Degdega ah ee Degmada

Qorshayaasha xaaladaha gurmadka deg-degga ah ee degmadu waa codsi ku saleysan webka oo lagu qeexay qorshaha gurmadka Degdegga ah ee Degmada. Ujeedada qorshayaashaani waa in laga caawiyo dhismayaasha dugsiyada degmada inay wax ka qabtaan xaaladaha degdegga ah. Waxaa sannad walba loo gudbiyaa maamuleyaasha dugsiyada oo dhan. Qorsha kasta waxaa loola socdaa si dhammaystiran oo sax ah.

Tababbarida Shaqaalaha

Waxaan siinaynaa fursado tababar iyo aqoon isweydaarsi loogu tala galay maamulayaasha iskuulada iyo shaqaalaha kuwaas oo daboolaya meelaha baahida iyo xiisaha loo qabo. Tusaalooyinka qaar ka mid ah tababaradaas la qabanaayo waxaa ka mid ah mowduucyada sida wacyigelinta baandooyinka gaangistada, badbaadada shaqsiyeed, ilaalinta hantida shaqsiyadeed, sida iyo goorta la waci karo khadka taleefanka 911, daminta xiisada hadalada afka iyo nidaamka xirida albaabada iskuulada.

La socoshada Tababarada Xaaladaha Gurmadka Degdega ee Iskuulka

Dugsi walba waxaa sharcigu farayaa in uu sameeyo xaddi gaar ah oo ah shaqooyinka tababarada gurmadka deg-degga ah oo ay ku jiraan: 5 jeer oo la xiraayo albaabada dugsiga, 5 jeer oo xaalada gurmadka degdega ah ee Dabka, Shan jeer/ Qaxida iyo 1 jeer oo Duufaanta Tornado.

wadatashiyada

Siinta adeegyo la-taliyeyaal leh iyo adeeg u gudbin ah maamulayaasha iyo shaqaalaha meelaha amaanka looga baahan yahay, iyo sidii loo qorshaynaayo.

Xarunta Taliska Dhexe ee Loogu Talo galay Hawlgallada Dhacdada Gurmadka Degdega ah ee MPS

Xaruntaan Waxay isku xiraysaa ilaha waxayna siisaa taageero dhacdooyinka halista ah ee socda ee la istcimaalo inta lagu guda jiro xaalada u baahan gurmadka deg dega ah iyo xaalada masiibada ka dib.

Qiimaynta Goobaha Dugsiyada

Waxaannu ku samaynaa qiimeynno dhab ah goobta dugsiga amnigiisa inaga oo la kaashaneyna maamuleyaasha iskuulka si aan u aqoonsanno meelaha ay ka wal-walsan yihiin. Waxaan markaa u soo jeedinaynaa talooyin ku saabsan hagaajinta iyo / ama isbeddelada ay sameeynayaan markaas.

Iskaashiga Sarkaalka Kheyraadka Iskuulka

Waxaan kormeereynaa baaxadda shaqada iyo adeegyada sarkaalka kheyraadka iskuulka 'SRO' oo ah Qeybta Dhalinta ee Boliiska Minneapolis. Kaaliyaha Sarkaalka Kheyraadka Iskuulka ayaa ah inuu si wada jir ah ula shaqeeyo iskuulada si loo dhiso xiriir xoogan maamulayaasha, waalidiinta, ardayda, iyo bulshada ku xeeran. Waxay ka shaqeeyaan iskuulada si loo garto dhibaatooyinka. iyo inay farageliyaan marxaladaha hore ee khilaafaadka ayna u soo bandhigaan fasalada iyo bulshada mowduucyada la xiriira hirgelinta sharciga iyo amniga.

Qiimaynta Xaaladaha Halista ah

Hanjabaadaha rabshadaha bartilmaameedsiga leh waxaa loo qaadanayaa inay ku lug leeyihiin labada arrimood ee amniga & ammaanka iyo welwelka caafimaadka maskaxda ah, sidaas darteedna waa in ay qiimeeyaan koox dhammaystiraan oo isku dubbaridan. Tallaabooyinka howshan waxaa ka mid ah sugidda amaanka iyo maareynta goobta, aruurinta xogta, qiimeynta dhacdada iyo taageeridda ka soo kabsashada dhibaatada bulshada dugsiga.

Maxay waalidiinta u baahan yihiin inay ka ogaadaan xaaladaha Gurmadka degdegga ah ee dugsiga:

Nidaam noocee ah ama habkee loo adeegsanayaa in lagu tababaro shaqaalaha?

Dugsiyada Dadweynaha Minneapolis waxay sameeynaynaa ka hortaga xaaladaha iyo sidii ay u fulin lahayeed ka jawaabida marxalada. Waxaan siinaynaa tababaro shaqaalaha ka hortaga dhibaatooyinka qalalaasaha aan tooska aheyn iyada oo loo marayo Machadka Kahortagga Dhibaatooyinka, waxaan heysannaa R.E.A.C.T. Qaabeynta hagida shaqaalaha iyada oo loo marayo dhacdo kasta oo khatar ah, waxaanan raacnaa hab-maamuuska FEMA / NIMS marka ay timaado isku-duwidda dhacdooyinka aadka u weyn ee halista ah.

Waa maxay R.E.A.C.T.?

Sanadkii 2015 Dugsiyada Dadweynaha Minneapolis waxay biloowday barnaamijka R.E.A.C.T. in la xoojiyo shaqaalaha si ay u maareeyaan heer kasta oo dhacdo shilal ah. Erayadaasna Waxay u taagan tahay Aqoonsiga xaaladda, Qiimee ikhtiyaaraadka, Sharciga, Wada xiriirka, iyo Qaadashadanidaamkaan. iyadoo loo marayo nidaamkan hab-socodka qaabeynta shaqaalaha oo loo oggol yahay inay adeegsadaan wixii ikhtiyaarro ah oo ku habboon xaaladda oo aan ku xirnayn hab-raacyo adag oo u horseedi kara go'aan-qaadasho.

Waa maxay Xirida Albaabada (Koodka Jaalaha)?

xirida albaabada iskuulka waxay dhacdaa marka ay jirto walaac nabadgelyo daro oo aan ahayn wax khatar deg deg ah ku timaado iskuulka. Tusaale ahaan, booliisku waxaa laga yaabaa inuu kula wareegaayo baabuurkiisa agagaarka iskuulka, maamulaha ayaa go'aamiya in iskuulku uu sameeyo shaqo ka fariisin sidii taxaddar feejignaan loo galo. in la xiro albaabada, ardayda iyo shaqaaluhu waa inay joogaan gudaha dhismaha dugsiga, oo nashaadaadka iskuulka ayaa u socon kara sidii caadiga ahayd iyadoo ardayda iyo shaqaalaha si nabadgelyo leh ugu dhex socdaan dugsiga dhexdiisa. Xirida albaabada iskuulka macnaheedu waa inuusan qofna soo galin iyadoo baaris qoto dheer lagu sameeynin ruuxaas, oo qofna kama baxo dhismaha dugsiga, ardayda iyo shaqaaluhuna ma ahan inay dareemaan xaalada ilaa inuu ka dhaco waqti ku dhow waqtiga kala-guurka xisadaha.

Waa maxay Xiritaanka (Koodka Cas)?

Xikrida albaabada iskuulku waxay dhacdaa marka ay jirto walaac nabadgeliyada oo ku saabsan qatar ku imaan karta iskuulka. Tusaale ahaan, booliisku wuxuu ku raad jooga ruux la tuhunsan yahay oo lug ku raaadinaayo iyada oo ruuxa la tuhmaayo uu ku jiro dhismaha iskuulka. Albaabaha la xiraayo ayaa sidoo kale la fulin doonaa haddii ay jirto hanjabaad laga dareemayo dugsiga dhexdiisa. Goobaha xiritaanka, ganacsiga iskuulka iyo nashaadaadka fasalka waa in la joojiyaa, qof walbaana waa inuu joogaa halka uu joogo, aamusnaan iyo dhuumasho. Ardaydu way ku aamusnaanayaan fasaladooda ilaa xiritaanka laga qaadanayo.

** Xusuusin: Labada xiritaanka albaabka gudaha iyo xiritaanka albaabka dibabada, marka la fulinaayo degmadu waxay la shaqeysaa la-hawlgalayaasha gurmadka degdegga ah si loo go'aamiyo waqtiga ku habboon ee lagu sii daayo dugsiga.*

Waa maxay Meelaha hoyga ama Gabaaadka ah?

Meel-ku-gabbashada ayaa ah marka ardayda iyo shaqaaluhu gabbaad ka dhigtaan meel aamin ah oo dugsiga ka mid ah; taasi waxay noqon kartaa fasalka ama hoolka iskuulka. Tani waxay dhacdaa marka ay jirto halis, sida tornaado ama digniin cimilo daran, iyo daadgureyn ama ka saaritaan hore oo ardayda gelin kartaa khatar.

Waa maxay Qaxitaanku?

Qaxitaanka ayaa ah marka ardayda loo bixiyo banaanka dhismaha iskuulka si looga hortago waxyeelo ama dhaawac ay sabab u tahay xaalad khatar ah oo gudaha iskuulka ka jirta, sida dab dhaca. Ama xaaladaha aadka u daran shaqaalaha iyo ardayduba waxay tagi doonaan goobta loo daadgureynayo haddii ay lagama maarmaan tahay in laga hortago waxyeelada ama dhaawaca ay sabab u tahay xaalad khatar ah gudaha ama dibadda dugsiga ka jirta.

Waa maxay Dib Isugu Soo Uruurinta?

Markii ardayda la geeyo meel kale ama aagu si xun u carqaladeyn ku sameeyo xirida albaabada dibada / ama ka xirida albaabka gudaha, shaqaalaha degmada ayaa ka jawaabaya goobta waxayna ka caawin doona hubinta in ardayga hagida saxda ah la siiyo loona ilaaliyo sida saxda ah. Tani waxay qaadataa waqti ka badan ka saarida caadiga laakiin waxaa loo sameeyaa si loo hubiyo nabadgeliyada iyo isla xisaabtanka kadib dhacdo daran oo daran.

Sideen ku ogaanayaa in xidhitaanka albaabada iskuulka ay ka jiraan dugsiga ilmahayga?

Himiladeena ayaa ah in aan u nuglaano baahiyaha qoysaska iyo in aan kula wada xiriirno macluumaad sax ah oo waqtiga ku habboon annagoon faragalin ku sameynaynin jawaab-celinada gurmadka degdegga ah ee socda ama aan qatar gelinaynin daacadnimada baaritaannada. Intaas waxaa sii dheer, waxaa muhiim ah in la miisaamo baahida loo qabo in la xakameeyo halista abuuri karto walwal dheeraad ah ama walaac ardayda, shaqaalaha iyo qoysaska. Arinta xirida albaabada iskuulka, borotokoolka ayaa ah in hogaamiyaha iskuulka uu go aansado heerka wada xiriirka ee lama huraanka u ah bulshada iskuulkooda. Haddii shaqo ka joojinta ay dhacdo meel u dhow waqtiga eryida, waqtiga imaanshaha ama haddii kale saameyn ku leh qoysaska, waxaan ku dhiirigelinaynaa hogaamiyaha iskuulka inuu u soo diro xiriirin qoysaska. Nooca (yada) isgaarsiinta waa inuu go'aamiyaa hogaamiyaha iskuulka iyadoo lagu saleynaayo doorbidida isgaarsiinta qoysaska ee dugsiga. Loogu talagalay dadka xiran, MPS waxay xiriirineysaa ogeysiiska waalidiinta iyadoo lala kaashanayo hogaamiyaha iskuulka. Maaddaama xiritaanku uu u horseedo carqalad weyn jawiga iskuulka caadiga ah, waxaa muhiim ah in qoysaska la ogeysiiyo. Xaaladaha badankood, MPS waxay isticmaashaa School Messenger, booqo www.mpls.k12.mn.us/school_messenger si aad u cusbooneysiiso macluumaadkaaga si aad u hesho macluumaad dheeri ah oo ku saabsan sida loo go'aamiyo wicitaanada, qoraalka iyo emaylka aad ka hesho MPS.

Maxaan sameeyaa haddii la xiro albaabada iskuulka uu ka dhacaayo xaalad gurmadka dugsiga ilmahayga?

Haddii lagugu soo wargaliyo xirida iskuulka /iyo xirida albaabada iskuuka cunugaaga, ha imaan iskuulka. Joog meesha aad awoodo in lagugula soo socodsiin karo ogeysiiyada macluumaad dheeri ah oo ku saabsan xaaladda cunuggaaga. Ardayda lama sii dayn doono ilaa ay dhibaatadu ka dhammaato ama goobta ay nabdoon tahay markaas ka din ayaa ah in la siidaayo. In kasta oo aysan tani badanaa dhicin, u diyaar noqo inaad cunuggaaga ku soo qaadato goobta dib u mideynta

ardayda haddii ardayda laga saaray dugsi. Adigoo ku xafidaya macluumaadkaaga xiriirka oo la socda dugsigaaga, waxaad heli doontaa farriin e-mayl leh oo otomaatig ah iyo wicitaan taleefan otomaatig ah marka ay jiraan wax gurmad ah oo ku yaal dugsiga ilmahaaga.

Maxay qoysasku sameyn karaan si loo caawiyo?

Kala hadal carruurtaada nidaamyada jawaab-celinta xaaladda gurmadka degdegga ah ee dugsiga si ay u ogaadaan waxa laga filan karo haddii ay dhacdo xaalad degdeg ah ama qalalaase. Hubso in macluumaadka xiriirka deg degga ee cunugaaga uu yahay mid ay heystaan dugsigaaga. Ardayda looma sii dayn doono dugsiga shaqsiyaadka aan fasax loo siinin, lamana awoodi doonno inaan kugula soo xiriirno xaalad deg deg ah haddii macluumaadkaagu khaldan yahay ama uu ahaa mid aan la cusbooneysiin. Haddii ilmahaagu qaato daawo, hubi in iskuulka heystaan ugu yaraan saddex maalmood sahayda daawada.

Waxyaabaha la sameeyn karo iyo Waxyaabaha aan la sameeyn karin waqtiyada dhacdooyinka halista ah ama xaaladda Gurmadka degdega ah ee dugsiga:

- Ka eego Shabakada MPS www.mpls.k12.mn.us for updated information. Sidoo kale eeg. MPS Twitter @MPS_News and Facebook @Minneapolis.Schools maadaama ay yihiin caadiyan safka ugu horeeya ee isgaarsiinta ee loo adeegsado xaaladaha qalalaasaha.
    - dhagayso macluumaadka fariimaha la xiriira halka aad kula kulmi karto cunuggaaga haddii ardayda laga saaro iskuulka. Xusuusnow inaad soo qaadatid aqoonsi dowladeed oo ansax ah goobta dib u mideynta haddii ay suurta gasho waxay howsha ka sii fududeyn doontaa.
    - Fadlan la soco in isukeenintu aysan badanaa dhicin arimahaas.
- HA imaanin dugsiga ilmahaaga haddii aan laguu soo sheegin ama lagugu soo wargalin mooyee. Tani waxay abuuri kartaa ciriiri xaga taraafikada iyo carqaladeynta shaqaalaha gurmadka.
- Ha soo wicin ilmahaaga ama iskuulka ilmahaaga. Wicitaanada taleefanka xad dhaafka ah waxay carqaladeyn karaan nidaamka taleefanka waxayna faragelin ku sameyn karaan isgaarsiinta xaaladaha gurmadka degdegga ah.
- Ha ku faafin macluumaadka baraha bulshada ee aan ahayn tan tooska ah ee MPS, xitaa hay'adaha wararka ayaa heleya macluumaad qaldan mararka qaar.
- KA HADAL OO SOO SHEEGPEAK UP haddii adiga ama ardaygaagu aad haysaan macluumaad ku saabsan halista ka imaan karta ama khatar kale oo xagga nabadgelyada ah, si qarsoodi ah ayaad ugu soo sheegi kartaa. Wac / Qoraal 612-416-1162

Nambarada Taleefoonada Muhiimka ah

Iskuulkaaga: _____

Khadka Guud ee MPS: 612-668-0000

Badbaadada Maareynta Degdega & Amniga: 612-668-0177

Gaadiidka: 612-668-2300

Xarunta Isgaarsiinta Degmada (xaalad degdeg ah oo keliya 24/7): 612-668-0322

Khadka Tooska bixinta xogta: 612-416-1162